

Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #19

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG
/FOODSAFETY

OAR 333-150-0000,
CUTUBKA 3-401.14

Cuntada xayawaanka ee cayriinka ah taasoo la kariyay ayada oo la isticmaalayo hanaan wax karin oo aan isdaba joog ahayn waa in: (A) Marka hore la galiyo hanaan kululayn oo aan muddadiisu ka badnayn lixdan daqiiqo; ^P (B) Islamarkiiba kaddib kululaynta koowaad, waa in la qaboojiyaa ayada oo la tixraacayo cabirada wakhtiga iyo heerkulka loo cadeeyay cuntada Khatarta Keeni karta ee la kariyay ¶ 3-501.14 (A); ^P (C) Qaboojinta kaddib, waa in lagu hayaa barafow ama qabow, sida ku cad cuntada Khatarta Keeni karta ayada oo la eegayo ¶ 3-501.16 (A) (2); ^P (D) Kahor iibinta ama adeegga, waa in la kariyaa ayada oo la adeegsanayo hanaan kululaynta dhammaan qaybaha cuntada ilaa heerkul gaaraya iyo wakhti u hogaansamaya mid kamid ah qaababka ayada oo lagu salaynayo cuntada la karinayo sida lagu cadeeyay 3-401.11. ^P (E) La qaboojiyay ayada oo la tixraacayo cabirada heerkulka iyo wakhtiga lagu cadeeyay cuntada Khatarta Keeni karta ¶ 3-501.14 (A) haddii aysan ahayn midkood in lagu hayo kulayl sida ku cad ¶ 3-501.16 (A), islamarkaaba la qaybiyay, ama lagu hayo ayada oo la isticmaalayo wakhtiga si uu u noqdo xakamaynta caafimaadka bulshada sida ku cad § 3-501.19 kaddib karinta dhammaystiran; ^P iyo (F) In loo diyaariyay loona kaydiyay si waafaqsan hanaanada qoran sida ku cad sharciga.

SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Hanaan kaanu wuxuu wax ka qabanaayaa koritaanka bakteeriyada duleelada samaysa sida Clostridium perfringens iyo jeermisyada kora sida Salmonella. Hanaan hore ee kululayntu si buuxda meesha ugama saarayo jeermisyadaan laakiin waxa uu yaraynayaa nooleyaasha la tartamaya ee kujira cuntada xayawaanka ee cayriinka ah. Goobta cuntadu waa in ay garataa cuntada kaliya qayb ahaanta loo kariyay lana qaboojiyay si ay u xaqiijiso in cuntooyinka aysan ku khaldamin shaqaalaha cuntada ee cuntooyinka sida buuxda loo kariyay una diyaarsan in la cuno.

Karinta aan isdaba Socon ee Cuntooyinka Cayriinka ah ee Xayawaanka Laga Helo

Goobo fara badan cuntooyinka si buuxda uma kariyaan marka hore si ay wakhti dhakhso ah ugu helaan dalab kasta xiliga adeegga. Tani sidoo kale waa dhaqan caam u ah cunto diyaariyayaasha, kuwaas oo inta badan 'calaamadeeya' digaagga ama hilibka jirka ah ee saaran aaladda shiilidda kahor munaasabadda la isugu imaanayo kaddibna ku dhammaystira hannaanka wax karinta goobta. Hanaankaan waxaa sidoo kale loogu yeeri karaa 'midab doorin' ama 'xoogaa yar karin'.

Wax karinta aan is daba socon waa karinta cuntada ee goobta cuntada ayada oo la isticmaalayo hanaan kaasoo kululaynta hore ee cuntada si ulakac ah loo joojinayo si cuntada loo qaboojiyo loona hayo sidii si dhammaystiran loo karin lahaa hadhow kahor inta aan la iibin ama la qaybin. Wax karinta aan is daba socon kuma jirto hanaan wax karinta kaasoo kaliya ku tacaluqa in si kumeel-gaar ah loo joojiyo ama loo yareeyo hanaan kale oo karin oo is daba socda, sida dux-marinta shinbirka turkey.

Kaydinta cuntadaan cayriinka ah ee xayawaanka laga helo ee qayb ahaanta la kariyay waxa ay lamid tahay waxsoosaarka cayriinka ah maadaama midkasta loo baahan yahay in loo kariyo heerkulka karinta kama danbaysta ah ee saxda ah ee ku qoran sharciga (in la talinta isticmaaluhu uu diyaarsan yahay maahane) iyo calaamadaynta taariikhda looma baahna.

**Goobtu waa in ay heshaa aqba-
laad hordhac ah oo ah ha-
naankooda oo qoraal ah kaasoo
ka imaanaya hay'adda maamulka**

Hanaanka cunto kasta:

- Waxaa laga rabaa in marka hore la galiyo hanaan kululayn oo aan muddadiisu ka badnayn lixdan daqiiqo
- Islamarkiiba kaddib kululaynta koowaad, waa in la qaboojiyaa ayada oo la tixraacayo cabirada wakhtiga iyo heerkulka loo cadeeyay
- Qaboojinta kaddib, lagu hayo qaboojin ama qabow

- Waa in la kariyaa ayada oo la adeegsanayo hanaan kululaynta dhammaan qaybaha cuntada kaasoo gaaraya heerkulka iyo wakhtiga u hogaansamaya 3-401.11
- Kaddib la qaboojiyo si waafaqsan 3-501.14(A) ama lagu hayo kulayl ka sareeya 135°F, islamarkiiba la bixiyo, ama la hayo ayada oo la isticmaalayo wakhtiga in uu noqdo xakamaynta caafimaadka bulshada

Hanaanka Qoran Waa in uu:

- Qeexaa sida shuruudaha loo mamulayo/loo dukumiintiyaynayo iyo tallaabooyinka saxitaanka ee la qaadayo haddii aan shuruudaha la buuxin;



**Dadka cuntada bixiya waxay
inta badan cuntada u kariyaan
qaab aan bislayn kahor inta
aysan ku 'dhammayn' mu-
naasabadda la isugu imaanayo**

- Qeexaa sida cuntooyinka, kaddib kululaynta koowaad, laakiin kahor karinta dhammaystiran, loo calaamadaynayo ama si kale loogu aqoonsanayo cunto loo baahan yahay in la kariyo kahor inta aan la bixin si loo iibiyo ama adeeg ahaan; iyo
- Qeexaa qaabka cuntooyinka looga soocayo cuntooyinka in la cuno u diyaarsan.